# Kaalmo Celinta

- Talosiinta
- Ururka Socdaalka gurigaada
- Kaalmo bilaabida dhaqaale (dadka waaweyn waa CHF 1000.-; carruurta waa CHF 500.-)
- Kaalmada caafimaadka iyo tallaabooyin gaar ah ee la siiyo dadka liita
- Mashaariicda shaqada
- Barnaamijyada tababarka
- Ka caawinta deegaameynta

## Waa maxay kaalma celinta?

Kaalmo celinta waxay ku siinaysaa caawinaad laguugu celinayo ku laabashadaada wadankaaga. Waxay fududeysaa bilow cusub iyo waxayna wax ka bedeshaa fursadahaaga isdhexgalka guulaha badan leh.

## Yaa awood u leh kaalmo celinta?

Qofwaliba oo ka yimid goobta magangelyada iyo qeybaha kale qaarkood ee jinsiyadaha ajaaniibta (tusaale ahaan, dhibanayaasha dadka la soo kexeeyo ee suuqmadowga ah). Xitaa haddii aad haysato xaalada magangelyo siyaasadeed, waxaad
awood u leedahay kaalmo celinta.

## Goorma iyo sidee?

Waxaad dalban kartaa kaalmo celinta labadaba intii lagu jiro iyo kadib inta ay suu socdaan hanaanka magangelyada. Wixii qeybaha kale ee jinsiyadaha ajaaniibta, shuruucyo qaas ah ayaa ku dabqan.

## Waa maxay talo-celin siinta?

Talo-celin siinta waa adeeg laguugu siinayo macluumaad ku aadan kaalmo celinta. Talo-siinta waa hadal aan jawaab cad bixineen oo sir ah. Wax duufsi kuma lug laha ee ku aadan awaamiirta magangelyada oo weli harsan. Waxay kaa caawinaysaa inaad siu diyaariso isuna abaabusho noqodkaaga

## Xagee baan ka helayaa talo-celin siinta?

Goqlkasta oo ismaamula oo Swiss ah wuxuu leeyahay adeeg talo-celin siin. iyo teleefan lambarada waxa ay ku taxan yihiin bogga xiga.